**Hordhac**

Furitaanka waa dhacdo muruga leh oo adag, laakiin haddii aad darastid heerka uu gaarsiisan yahay waxqabadka nidaamka sharciga, mushkiladiisa ayaa yaranaysa. Annago ah Garsoorayasha Maxkamadda Qoyska waxaan raja fiican ka qabnaa in buug-yarahan ku siiyo hab wanaagsan oo aad ku fahamto qaabka ay wax u dhacayaan, kaana caawiya furriinka adiga oo ka haysta fikrado caqligal ah iyo ujeeddoyin cad. Hawsha furriinka waxa la yiraahdaa "ku heshiinta kala tegidda" ama "kala tegidda".

**Xudduudka**

Qaabka furriinka Minnesota wuxuu ku salaysanyahay xeerka ah "in uu jiro ismaandhaaf", macnaheedu yahay in labada dhinac uu dhinac aaminsanyahay in guurku uu sii jirin karin. Guud ahaan sababaha keenay in guurka uu xumaaday ma aha arrimo maxkamaddu ay isku daalinayso. Arrinka kaliya ee la qaddarinayo in fasakha uu laga maarmaan yahay.

Annaga shaqadeena ma aha in aan soo celinno dhibaatoyinka muragada leh ee ka yimaada furriinka. Waa in aad fahamtaa in hannaanka sharciga aan loo dajin in lagu ciqaabo xaskaaga/saygaaga. Maxkamaddu ma aha meel lagu kala aarsanayo. Waa in aan go'aan ka gaarno annaga oo dacwadaada u eegeyna waxyabaha u gaarka ah. Badanaaba, sharciga nama siinayo fursad aan hal dhinac ugu dhfaano dhagarta uu ka galay dhinaca kale.

**Heshiis**

Sida ugu wanaagsan ee wax lagu xalliyo waa in la heshiiyo. Waan-waanta iyo wax wadaqabsiga ayaa lagu gaaraya heshiis afgarasho fiican leh dhimayana khilaafka dhexmara adiga iyo xaaskaaga ama saygaaga. Dacwooyinka badankooda waxay leeyihiin wadahadallo dhaliya heshiis ka waxtar badan kuwa leh is qabqabsi ay maxkamadoodu lacag badani ku baxdo. Haddii wadahadallada lagu heshiin waayo markaas waa in dacwadda maxkamad lagu kala baxo, taasoo go'aankeedu uu raad ku yeelan doono caruurtiina. Xukunkeena wuxuu go'aan ka gaaraya arrimaha xaddidan ee la horkeeno inta ay dacwadda socoto oo aysan ku jirin wax kale. Sababta loo xaddiday waxa aan qaban karno iyo waxa ayna waxba ka qaban karin waxaa weeye in heshiiska uu inoo furi karo fursado badan. Waydii xoghaynta maxkamadda mashruucyada la xiriira dhex-dhexaadinta. Dhex-Dhexaadiyaha waa qof aan dhinacna la jirin oo tababar u leh sida adiga iyo xaskaaga/saygaaga aad heshiis ku gaartaan.

**Kala-duwanaanta**

Furriin waliba waa uu ka duwanyahay kuwa kale. Natiijadaada waxay si weyn uga duwanaan karaan kan deriskaaga, saaxiibkaaga, ama qof qaraabo ah. Ma filan kartid in natiijada dacwadaada uu la mid ahaado natiijada dacwadahooda. dacwadaha loo malaynayo in ay isku mid yihiin runtii sidaas ma aha waana mid si aad uga duwan sharciguna uu si ka duwan u eego. Sababtan awgeedna waxaa waajib ah in aad la tashatid qareenkaaga si aad u fahamtid waxa uu sharciga qorayo. Saaxiibbadaada iyo qaraabaduba ma aha kuwo aqoon u leh sharciga ku tla xiriira dacwaddada, taladooduna waxa dhici karta in dacwaddaada ay dib u dhigto.

**Dhaqaalaha**

Marka uu guurka burburo, dhaqaalaha, hantida iyo deymaha la galay intii reerku dhisnaa waa in adiga iyo xaaskaaga/saygaaga aad kala qaybsataan. Sharciga ayaa xusaya in dhaqaalaha shirko aad ku tihiin adiga iyo xaaskaaga/saygaaga in aad qaybsanaysaan dakhliga iyo dhaqaalaha lagu helay wadaagidda. Waxaana la rabaa dhaqaalihiina oo idil in aad cadeysaan. Dadka badankiis furriinka isbaddal ayuu nooloshooda u keenaa. Maadaama furriinka uusan dhalinaynin dhaqaale ama dakhli, waa waajib in hantida loo kala qaybiyo labada qof. Labada qof waa ka kharash badan yihiin qofka kaliya. Marka aad heshiis galaysid waa in aad ka fiirsatid in marka dacwadda wax lagu dhammaynayo uu soo galayo kharashka qareenka. kharashayada ku baxa dacwadda isqab-qabsiga leh ayaa noqon kara mid aad u sarreeya. Caadi ahaan marka heshiis wax lagu dhammeyo waxaa si weyn hoos u dhacaya kharashka ku bixi lahaa maxkamadda, waana arrin u baahan in si fiican looga fiirsado haddii aad tahay qof danyar ah.

**Waxa laysku haysto**

Guud ahaan ku heshiinta kala tegidda waxa uu saameynayaa afar arrimood oo waaweyn: korsashada ubadka iyo waqti la qaashada ubadka, taageerada dhaqaale ee ubadka , masruufka iyo marashada, iyo qaybsashada hantida iyo deymaha. Kaddib marka dacwadda la gabagbeeyo, waxaa nala weydiin doonaa in aan wax ka badalno korsashada, masruufka, ama maalinjooga. Waxaa loo baahanyahay in aad fahamtid waji kasta ee dacwaddaada.

**Taageerada dhaqaale ee ubadka**

Labada waalid iyo caruurtooda waxaa dhici karta in loo diro mashruuca waxbarashada inta furiinku aanu dhaqan gelin. Mashruuca wuxuu kaa cawinayaa fahamka samaynta uu furriinku ubadka ku yeelan karo, iyo sida aad marxaladda kalaguurka loo fududeyo. Xusuuso in guurka uu burburay laakiin ubadka aad dhashay in aysan weligood kaa haraynin. Waalidka badankood waxa ay wada qaybsanayaan masuuliyadda waalidnimo ee caruurtoda kaddib marka guurka la dhameeyo. Sidaas marka ay wax u dhacaan, waa in aad labadiina ka wadatashataan sidii aad u gaari lahaydeen go'aan caruurtiina waxtara.

Caadi ahaan, waalid mid ayaa ahaanaya midka korsanaya oo ay isku meel joogayaan. Haddii aysan jirin wax xaddidaya waqti la qaashada ubadka, waalidka kale loo ogolanayaa in uu ubadka booqdo. Korsashada ubadka waxaa asaas u noqonay maslaxadda u ah ubadka. Marar badan, hal dhinac ayaa ka xumaanaya go'aankeena, siiba marka uu jiro go'aan ah "guul/guuldarro". Xaqiiqadu cidna guuldarro la kulmimayso haddii la diffacayo danaha ubadka.

Gabi ahaanba dacwadaha korsashada eeuabdka waxaan labada dhinac kula talinaa in dhex-dhexaadin ay xaaladdooda ku dhammeeyaan. Dhex-dhexaadiyuhu waa dhinac saddexaad ee dan gaar ah aan lahayn idinkana caawiya sidii aad u gaari lahaydeen heshiis ubadka u roon. Waalidka ubadka korinaya ayaa dacwadda fududaynaya caruurtiinana si weyn uga caawinaya in aysan waxba ka soo gaarin dhibaatoyinka furriinka. Haddii uu dhacay dagaal, Maxkamaddu idinkama codsan karto in aad yeelataan heshiis dhex-dhexaadin ah.

Haddii ay dhici wayso in heshiis laga gaaro waqti la qaashada ubadka waalidka, waxaa la amrayaa daraasad ku saabsan korsashada, kharashkiisa ay qaybsanayaan dhinacyada.

Kiisaska tuhunka xadgudubka ubadka ee ka socda hal waalid inta uu socodo furiinka, waxaanu magacaabaynaa masuul (GAL) kaasoo difaacaya danaha ay ubadka leeyihiin marka la eego korsashada, taageerada iyo waqti la qaashada ubadka waalidka. GAL waxaa kaloo loo magacaabi karaa haddii ay maxkamaddu rumaysantahay in shiddada meesha ka jirta ay halis u tahay ammaanka ubadka ama haddii danaha ubadka aan si fiican wax looga qabanaynin. Hawsha GAL ayaa ah in uu sameeyo (in ay samayso) baaris madax bannaan oo lagu eegayo waxa ubadka u roon iyo in loo doodo sidii arrimaahaasi xal looga gaaro. GAL waa in uu/ay akhbaarta si asturan u hayso, laga warhayo danaha ubadka inta uu dacwadda socdo iyo in maxkamadda loo soo diyaariyo warbixin qoraal ah ee ka tarjumaysa danaha ubadka. Haddii GAL la magacaabo waxaa dhici karta in laydinku soo dallaco kharashka adeegyadooda.

**Taageerada dhaqaale ee ubadka**

Marka laga reebo gacalada aad u haysid ubadkaaga iyo in aad had iyo jeer wakhti badan la qaadato, waalid ahaan ma jirto xil ka wayn in aad sii wadatid tageerada aad siinaysid ubadkada furriinka ka dib. Taageerada dhaqaale ee ubadka waa xilka ugu muhiimsan ee waalidka. Labada waalidba mas'uuliyad ayaa ka saaran taageerada dhaqaale, laakiin waalidka aan ubadka korinaynin ayaa laga raba in taageero dhaqaale uu siiyo waalidka kale. Taasi macaneheedu ma aha in waalidka wax korinay in aysan masuliyad ka saarnayn taageerada dhaaaale ee ubadka .

Minnesota waxay leedahay xeerar ay waajib tahay in la raaco. Saaxibadaada iyo Qarabadaada waxaa dhici karta in ay sanado badan ka hor ay haleen furrin ama waxaasi gobollo kale lagu xukumay ama ay qaataan masruuf ka sarreya ama ka hooseeya kuwa ay xeerarkeena leeyihiin. Taageerada dhaqaale ee ubadka ee dacwaddaada wuxuu ku salaysnaan doona dakhliga soo gala waalidka taageerada bixiya, iyo baahida ubadkaaga marka loo eego xeerarka ku xusan oo uu soo dajiyay Gobolka. Waa dhici karta in aan la bixin lacagta xeerarku dhigayo ee layska rabo laakiin waa inaad caddaysid in ay taasi tahay tahay mid sharciga waafaqsan.

**Taageero dhaqaale oo labad waalid mid kan kale siiyo**

Mararka qaarkood waxan xukun ku bixinna taageeradaas. Iyadoo uu wehliyo taageerada dhaqaale ee ubadka , waxaan eegaynaa laba arrimood: baahida uu qabto hal dhinac iyo awoodda dhaqaale ee dhinaca kale. Labadaan arrimood waa in ay reerka is qaba maxkamadda ka caddeeyaan. Taageeradaas waxaa dhici karta in la siiyo xaaska ama sayga taasoo ku xiran muddada guurka iyo arrimaha kale ee dhaqaalaha. waxaa dhici karta in uu socdo muddo joogto ah ama muddo gaaban.

**Qaybsashada Hantida**

Sida uu xusayo sharciga Minnesota, waa in aan isku dayno sidii aan u samayn lahayn "si xaq ah in cadaalad wax lagu qaybiyo" hantida iyo daynta guurka. Macnaha "cadaalad" ma ah in mar kasta si "isku mid ah" wax loo qaybiyo. Arrimo badan oo uu ka mid yahay taageerada dhaqaale ee ubadka , korsashada iyo taageerada dhaqaale, ayaa sababi kara in hantida aan si siman loogu kala qaybinin. Inta badan ma qaybino hantida iyo daynta ka jirta guurka ka dib.

**Kharashka Qareenka**

Waxaan hal dhinac ku xukumi karnaa in uu bixiyo qayb ama kharashka qarreenka ku baxda oo idil. Sidaan waxaan u yelaynaa si ay labada dhinacba ay u helaan fursado siman iyo qareenno karti leh. Dacwad waliba ma xukunno in kharash la bixiyo, waxaan marka hore eegnaa in dhinac uu si weyn uga dhaqaala badan yahay dhinaca kale.

Iskuma haleyn kartid in aan xukumayno in kharashka bixiyo. Sidaa darteed, hoos u dhaca ayay arrinkan u keeni kartaa hantida guurka, cid kasta (dhinacyada iyo qareenada) waa in ay culays saaran sidii kala tagga loogu dhammayn laha kharashka ugu yar ee suurto galka ah.

**Garsoorahada warqado ha u dirin**

Nalooma oggala in aan akhrisanno warqado ay ku qoran yihiin dhacdooyin, eedo dacwaddaada ku saabsan, ama in aan telefoonka adiga ama qaraabadada kula hadalno. Haddii ay jiraan ariimo ay tahay inaan ogaano, nala socdosii si dhegaysi warqadahaas ku saabsan loo qabto.

**Filo Wax Macquul ah**

Waxa aad la kulmi doontaa rajo xumo haddii ay kula tahay in aad dacwad kasta ku "guuleysanaysid". Way yar tahay in labada dhinacba midkood uu ku farxo dacwadda kasta oo go'aan laga gaaro. Xitaa xukunka ugu fiican kama uu farxinayo labada dhinac midna. Qareenkaada si fiican uga dhaadhici in uu ku siiyo natiijada dhabta ee dacwaddaada ka soo bixi kara.

**Xiriiri xaaskaagii/saygaagii hore**

Inti ay caruurtu ku jirto dacwadda, adiga iyo xaskaaga ama saygaagii hore waa in aad wada shaqaysaan. Caruurtiina ilaa heer ayay wax ka soo gaarayayaan haddii aydinaan riiri ama wadashaqayn karin.

**Khubaro kaa caawisa arrima dareenka la xiriira la tasho**

Fadlan ku dadaal in aad ka adkaato dareenkaaga inta ay dacwaddu socoto. Dareenka, carada, xanuunka, iyo daacad darrada waa wax la fahmi karo, laakiin marka si aan qumanayn ay maxkamadda ka dhacdo waxaa dhici karta in faragalin ay ku samaydo hawlaha la xiriira xogta aan kaa donayno. Haddii ay dhib kugu tahay in aad xukunto coolaadda, carada, ama muragada oo badanaaba lagala kulmo furriinka, fadlan isku day in aad heshid caawimaad talo aad arrintaas kaga gudubtid. La taliye wacan wuxa uu kaa caawini karaa adiga iyo ubadkaaga sidii aad uga gudbi lahaydeen marxaladahaan adag oo caradu kuu horseedi karto dhibaatoyin kale.

**Booqashada Waalidka ee Ubadka**

Haddii aad tahay waalidka ubadka hay oo maxkamaddu ay amartay waqti la qaashada ubadka dhexmara ubadkaaga iyo waalidka aad kala tagteen, xil baa kaa saaran in aad booqshadaas dhirrigaliso. Waa in aad waalidka kale ka caawintaa sidii uu booqashadaas ku heli lahaa. Ku dhirrigali in ubadkaaga ay waqti badan la qataan waalidkooda lana yeesho xiriir miro dhal ah. Marna waqti la qaashada ubadka ha ka dhiganin wax aad kula gorgortid waalidka kale. Laakiin haddii arrimo xagga caafimaadka maskaxda, isticmaalka maandooriyayaasha, xadgudub ama arrimo kale ay soo ifbaxaan adigana ay kula tahay in ay jiraan wax ammaanka ubadkaada wax u dhimaya ee dhinaca kale, raadso la-taliye xirfad leh waxa aad ka samayn lahayd.

**Ubadkada fursado sii**

Sida aad adiga iyo xaaskaaga/saygaaga u maamushaan furiinkiinna waxa ay saamayn wayn ku yeelan doontaa caruurtiina. Haddii aad murantaan oo aad is dagaashaan, dhibaatadooda iyo xanuunkooda waa uu sii kordhayaa. Haddii aad u dhaqantaan si is faham leh, waxaad caruurtiina ku caawin kartaan sidii looga gudbi marxaladda ugu adag ee noloshooda soo marta.

Gobolka Minnesota

Buug-yaraha Waxbarashada Guud

## Daabacaadda Waxbarashada Dadweynaha

## Ka Socota Garsoorayaasha Maxakamdda Qoyska

# Waxa laga Filayo…

# FURRIINKA

# Minnesota

Fasaxa dabacidda koobiga oo laga haysto Manifesto Continere (Gerald B. Keane, esq.) ayadoo looga mahadcelinayo Urururka Qareennada Degmada Sarasota iyo Garsoorka Laba-iyo-tobonaad Maxkamadda Qoyska Florida.